Xeerka Booqdaha Xarunta Caafimaadka ee Wexner

Waxaan diyaarinay taxadaradaan soosocda ee loogu talagalay booqdaha si aan u ilaalino caafimaadka bukaanadeena, shaqaalaheena iyo booqdayaasheena.

Sababo la xariira COVID-19, kaliya hal booqde oo ku qoran bukaan jiifka ayaa loo oggol yahay isbitaaalka iyo waaxaha xaaladaha degdega ah.

Majiraan booqdayaal loo oggol yahay goobaha bukaan socodka.

Marka laga reebo goobaha gaarka ah ee hoos lagu qoray.

Xarunta Tallaalka ee kutaalo Goobta Schottenstein

Booqdayaasha iyo asxaabta lama oggola

Marka laga reebo:

- Haddii qofku u baahan yahay caawimaad, markaas waxaa wehel yeeli kara hal qof oo wayn oo daryeel siiya.

Bukaan socodka / Socod baradka

Booqdayaasha / asxaabta lama oggola. illaa xaalad gaar ah daraadeed loo oggolaado mahee

Booqdayaasha / asxaabta waa inay ku haraan gaariga waxayna boqashada bukaanka oga qaybgali karaan taleefoon.

Marka laga reebo:

- Hal (1) qof oo wayn ayaa loo oggolyahay maalinta qaliinka aaga loogu talalagalay
- Hal (1) qof oo wayn waa inuu la socdo bukaanka haddii naafonimo jireed ama garashadiisa ay saameyn ku yeelatay awoodiisa si qaab wax ku ool ah looga qaybqaato daryeelka caafimaadkiisa.
- Bukaanada qaba naafonimo jireed iyo mid garashaba oo horey si guul leh oggola noolaa guriga daryeel bixiyaasha, hal (1) daryeel bixiye oo ah qof wayn ayaa wehlinaaya bukaanka. Bukaanada leh dhibaatooyinka garasho ama jir ee cusub, ama ahaa bukaan katirsan Isbitaalka Baxnaaninta ee Dodd, tababarka iyo waxbarashada daryeel bixiyaha waxaa loo oggolaan doonaa si gaar ah ayaana loo hormarin doonaa si loogu guuleysto daaweynta iyo isbitaal ka saarista.
- Hal (1) bukaan/masuul ee ilmaha yaryar (<18 sano)

- Hal (1) qof oo wayn ayaa wehlinaaya bukaanada James oncology ee cusub
- Hal (1) qof oo wayn ayaa wehlinaaya bukaanka lagu talaalaayo xubin jir oo adag kahor iyo kadiba
- Bukaanada uurka leh
  - Majiro qof loo oggolyahay booqasho umuliso, baaritaanka sawirka dhalmada (ultrasound) ama booqashada umulisada ee aadka halista u ah (daawada hooyada uurka leh)
- Illaa (2) labo booqdayaal ayaa loogu talagalay kulanka daryeelka

Majiraan booqdayaasha bukaanka oo la xaqiijiyay ama laga shakiyay inay qabaan kiisaska COVID-19, (illaa bukaanku yahay ilmo mahee ama uu haysto kaliya hal (1) waalid/masuul)

Goobaha bukaan socodka, la xariir xaafiiska daryeel bixiyahaaga si aad si toos ah ogala hadasho waxyaabaha ka reeban booqashada.

Waaxda/Qeybta Gurmadka

Halkii bukaanba waxaa maalintii loo oggol yahay hal booqde oo la magacaabay. Booqdaha waa inuu sii joogo banaanka illaa bukaanka laga geenaayo qol IYO baaritaanka COVID-19 laga helaayo ayadoo sheegeysa inuusan qabin.

Booqdayaasha - waxyaabaha aad rabto inaad ka ogaato

- Dhammaan booqdayaasha Xarunta Caafimaadka Gobalka Ohio ee Wexner waxaa laga baari doonaa heerkulka waxaana la siin doonaa maaskaro. Booqdayaasha waa inaysan qabin calaamadaha COVID-19 ayna waayahaan ku dhawaan bukaano qaba COVID-19.
  - Marka aad albaabka imaato waxaa lagaa doonayaa inaad keento aqoonsi leh sawir oo ay bixiso dawladu
  - Booqduhu waxaa qoorta loo suri doonaa calaamad leh sawir oo ay qabi doonaan inta ay kujiraan booqashadooda.
  - Booqdaha waa inuu xirtaa maaskarada la siiyay kuna xiraa afka iyo sanka uuna joogteeyaan kala fogaanshaha bulshada waqti kasta
  - Booqdaha waa inuu kusii jiraa qolka bukaanka ay booqdeen inta ay booqashada kujiraan
  - Lama oggola booqdayaal kayar 18 sano
  - Isla marka bukaanka la jiifiyo, booqdaha waa inuu raaco tilmaamaha booqashada: 8 barqanimo illaa 7 habeenimo.

Majiraan booqdayaasha bukaanka oo la xaqiijiyay ama laga shakiyay inay qabaan COVID-19, marka laga reebo wadaadada kujira xaaladaha nolasha ee ugu danbeeya (illaa bukaanku yahay ilmo mahee ama uu haysto kaliya hal (1) waalid/masuul). Waxaa la diyaarin karaa booqasho muuqaal ah.

Marka laga reebo:

- Illaa (2) labo booqdayaal ayaa loogu talagalay kulanka daryeelka
- Xaaldaha "Goynta nolasha" iyo qorsheynta isdilida

- Booqashada waxaa lagu xadidi karaa ayadoo ay ikhtiyaar u leeyihiin koxda daryeelka rugta caafimaadka
- Booqdayaasha waxaa lagu xadidi karaa qoysaska dhaw oo kaliya
- Bukaanku waxaa soo booqan karo hal (1) qof oo ah wadaad si ay u helaan taageero dhanka ruuxada ah haddii ay codsadaan qoyska iyo bukaanka, oo ay kujiraan bukaanada qaba iyo kuwa aan qabin COVID-19
- Hal (1) qof oo wayn waa inuu la socdo bukaanka haddii naafonimo jireed ama garashadiisa ay saameyn ku yeelatay awoodiisa si qaab wax ku ool ah looga qaybqaato daryeelka caafimaadkiisa
- Bukaanada uurka leh -- hal (1) qof ayaa taageero siin kara xiliga foosha iyo Dhalmada
    - Kadib marka Dhalmada iyo Foosha, hal qof oo taageero bixiya ayaa la siin doonaa suunka cagaaran ee gacanta lagu xirto (oo ay ku qoran tahay booqde iyo magaca koowaad ee booqdaha) si uu u wehliyo bukaanka. Hal qof oo bixiya caawimaad joogto ah illaa marka bukaanka foosha lagu keeno illaa isbitaalka laga bixinaayo
- Hal (1) Waalid/masuul ee ilmaha yaryar (<18 sano)

Majiraan booqdayaasha bukaanka oo la xaqiijiyay ama laga shakiyay inay qabaan COVID-19, marka laga reebo wadaadada kor ku xusun (illaa bukaanku yahay ilmo mahee ama uu haysto kaliya hal (1) waalid/masuul)

Codsashada waxyaabaha ka reeban Booqdaha

- Haddii aad isleedahay bukaanku waxaa uu u qalmaa mid kamida waxyaabaha ka reeban booqdaha, fadlan la xariir xubin kamid ah kooxda darteelka bukaanka.
- Haddii aad u baahan tahay caawimaad dheeraad ah, fadlan la xariir Waaxda Khibradaha Bukaanka:
    - 614-293-8944: Jaamacada Isbitaalka Gobalka Ohio, Isbitaalka Wadnaha ee Ross, Isbitaalka Baxnaaninta Dodd
    - 614-293-9600: Isbitaalada Gobolka Ohio ee Harding
    - 614-257-2310: Isbitaalada Gobalka Ohio ee East
    - 614-293-8609: Isbitaalka Kansarka James iyo Machadka Cilmi baarista ee Solove

Isbitaalada

Halkii bukaanba waxaa maalintii loo oggol yahay hal booqde oo la magacaabay

Booqdayaasha - waxyaabaha aad rabto inaad ka ogaato

- Dhammaan booqdayaasha Xarunta Caafimaadka Gobalka Ohio ee Wexner waxaa laga baari doonaa heerkulka waxaana la siin doonaa maaskaro. Booqdayaasha waa inaysan qabin calaamadaha COVID-19 ayna waayahaan ku dhawaan bukaano qaba COVID-19.
    - Saacadaha la booqan karo bukaana gudaha kujira: 8 barqanimo illaa 7 habeenimo.
        - Saacadaha booqdayaashu imaan karaan Isbitaalka Baxnaaninta ee Dodd: 4 galabnimo illaa 7 habeenimo, Isniinta illaa Sabtida; 8 subaxnimo illaa 7 habeenimo, Axada

- Marka aad albaabka imaado waxaa lagaa doonayaa inaad keento aqoonsi leh sawir oo ay bixiso dawladu
- Booqduhu waxaa qoorta loo suri doonaa calaamad leh sawir oo ay qabi doonaan inta ay kujiraan booqashadooda
- Booqdaha waa in lagu aqoonsadaa diiwaanka caafimaadka elektarooniga ah.
    - Bukaanadu waxay magaca booqdayaasha gelin karaan taableetkooda MyChart
- Booqdaha waa inuu xirtaa maaskarada la siiyay kuna xiraa afka iyo sanka uuna joogteeyaa kala fogaanshaha bulshada waqti kasta
- Booqdaha waa inuu kusii jiraa qolka bukaanka ay booqdeen inta ay booqashada kujiraan
- Lama oggola booqdayaal kayar 18 sano
- Daryeelka muhiimka ah iyo xaalaha kale ee gaarka ah waxaa laga yabaa inay leeyihiin xanibaado dheeraad ah

Ka reebitaanada kale waa in la oggolaadaa ayadoo lagu saleenaayo Khibradaha Bukaanada.

Majiraan booqdayaasha bukaanka oo la xaqiijiyay ama laga shakiyay inay qabaan COVID-19, marka laga reebo wadaadada kujira xaaladaha nolasha ee ugu danbeeya (illaa bukaanku yahay ilmo mahee ama uu haysto kaliya hal (1) waalid/masuul). Waxaa la diyaarin karaa booqasho muuqaal ah.

Marka laga reebo:

- Illaa (2) labo booqdayaal ayaa loogu talagalay daryeelka wada sheekeysiga
- Xaaladaha "goynta nolasha"
    - Booqashada waxaa lagu xadidi karaa ayadoo ay ikhtiyaar u leeyihiin koxda daryeelka rugta caafimaadka
    - Booqdayaasha waxaa lagu xadidi karaa qoysaska dhaw oo kaliya
    - Bukaanku waxaa soo booqan karo hal (1) qof oo ah wadaad si ay u helaan taageero dhanka ruuxada ah haddii ay codsadaan qoyska iyo bukaanka
- Hal qof oo wayn wa inuu la socdo bukaanka haddii naafonimo jireed ama garashadiisa ay saameyn ku yeelatay awoodiisa si qaab wax ku ool ah looga qaybqaato daryeelka caafimaadkiisa. Booqashooyinka ka baxsan saacadaha booqashada waxaa qasab inay ansixiyaan kooxda daryeelka.
- Bukaanada yaryar (<18 sano jir ah) waa inay helaan hal (1) booqde oo kaliya noqonaaya waalidka/masuulka
- Bukaanada uurka leh
    - Hal (1) qof oo caawiya qof foolanaaya ama kan Dhalaaya kaliya
        - Kadib marka Dhalmada iyo Foosha, hal qof oo taageero bixiya ayaa la siin doonaa suunka cagaaran ee gacanta lagu xirto (oo ay ku qoran tahay booqde iyo magaca koowaad ee booqdaha) si uu u wehliyo bukaanka. Hal qof oo bixiya caawimaad joogto ah illaa marka bukaanka foosha lagu keeno illaa isbitaalka laga bixinaayo
        - Umulisada Dhaqanka: Marka laga yimaado hal qof oo caawimaad bixiya xiliga dhalmada iyo foosha, hal umuliso oo la aqoonsaday, kuna qoran liiska diiwaanda bukaanka, ayaa loo oggolaan doonaa qof aan qabin COVID-19 isla marka la oggaado foosha

        - Umulisada dhaqanka waa inay aqoonsigeeda keentaa goobta baaritaanka waana inay xirato magaca qaybta ay ka tirsan tahay inta ay isbitaalka joogto
        - Umulisooyinka waxaa qasab ah inay u hogaansamaan nidaamyada iyo xeerarka badqabka COVID-19 ee Xarunta Caafimaadka Gobalka Ohio ee Wexner, oo ay kujiraan bixinta iyo xirashada qalabka lagu ilaaliyo indhaha (dhalooyinka indhaha lama oggola)
- Baaritaanada iyo Qaliinka
    - Qaliinka
        - Hal (1) booqde ayaa loo oggol yahay inuu wehel yeelo bukaanka inta uu kujiro qaliinka isla maalinta qaliinka
    - Baaritaanka bukaanada socodka
        - Bukaanada lagu qoray inay yihiin bukaan socod (tusaale, Raajada gudaha) oo u baahan in habeen la joogo waxay raaci doonaan tilmaamaha booqdayaasha bukaan jiifka

Majiraan booqdayaasha bukaanka oo la xaqiijiyay ama laga shakiyay inay qabaan COVID-19, marka laga reebo wadaada kor ku xusun (illaa bukaanku yahay ilmo mahee ama uu haysto kaliya hal (1) waalid/masuul).

Codsashada waxyaabaha ka reeban Booqdaha

- Haddii aad isleedahay bukaanku waxaa uu u qalmaa mid kamid waxyaabaha ka reeban booqdaha, fadlan la xariir xubin kamid ah kooxda darteelka bukaanka.
- Haddii aad u baahan tahay caawimaad dheeraad ah, fadlan la xariir Waaxda Khibradaha Bukaanka:
    - 614-293-8944: Jaamacada Isbitaalka Gobalka Ohio, Isbitaalka Wadnaha ee Ross, Isbitaalka Baxnaaninta Dodd
    - 614-293-9600: Isbitaalada Gobolka Ohio ee Harding
    - 614-257-2310: Isbitaalada Gobalka Ohio ee East
    - 614-293-8609: Isbitaalka Kansarka James iyo Machadka Cilmi baarista ee Solove

Booqashada Muuqaalka ah

Facebook Messenger

Facebook Messenger waxaa hada laga heli karaa taableetka MyChart Bedside ee loogu talagalay bukaanada isbitaalka laga qoro si looga taageero booqashada muuqaalka ah ee ay la yeelanayaan dadka ay jecel yihiin. Bukaanada waa inay galaan ayadoo isticmaalaya macluumaadka akoonkooda Facebook si ay qoysaskooda iyo saaxiibadood ula sameeyaan wada sheekaysi muuqaal ah inta ay isbitaalka kujiraan.

Hada aalada Zoom-ka waxaa laga helayaa shaashada kore ee taableetyada MyChart Bedside

Marka laga qoro isbitaalka, bukaanada iyo daryeel bixiyaashooda waxay isticmaalu karaan taabeelka MyChart Bedside oo ay ka helayaan Xarunta Caafimaadka Wexner. Marka aad hesho MyChart Bedside,

waxaad dalban kartaa cuntooyin, waxaadna fiirin kartaa macluumaadka caafimaadka, waxaadna dulmar ku sameyn karaa agabka waxbarashada ee ku saabsan xaaladaada, waxaad fariimo aan ahayn degdeg u diri kartaa kooxdaada daryeelka waxaadna kala xariiri kartaa xubnaha qoyskaaga iyo dadka aad jeceshahay adoo isticmaalaya Zoom.

Akoonka MyChart lagaama doonaayo inaad u isticmaasho MyChart Bedside ama Zoom. Waxaad u baahan doontaa inaad sameysato akoonka Zoom iyo aadna la kulanto qoyska iyo saaxiibada haddii aad sidaas sameyn karto. Bukaanada aan awoodin inay sameystaan akoonka Zoom, xubnaha qoyska kamid ah waxay bixin karaan caawimaada daryeelka kooxda.

Baaritaanka Booqdayaasha

- Dhammaan booqdayaasha bukaanka iyo xarumaha dhaqdhaqaaq baradka waxaa laga baarayaa calaamadaha iyo heerkulka
- **Booqdayaasha waxaa la waydiin doonaa inay ka baxaan goobta haddii ay qabaan calaamado inta lagu jiro 24 saac ama way la kulmeen qof qaba xanuunka 14 kii maalmood ee lasoo dhaafay.**
- **Booqdayaasha leh calaamadaha waa inaysan soo booqan isbitaalka laakiin waa inay raadsadaan daryeel caafimaad**
- Booqdayaasha waa inay dhaqaan gacmahooda, ama ay isticmaalaan daawada gacmaha, kahor iyo kadib isbitaalka iyo dhismooyinka isbitaalka

Albaabada dhismooyinkaas si kumeel gaar ah ayay oga xirnaan doonaan dadwaynaha:

- Isbitaalka lafdhabarta iyo Maskaxda Ohio: Albaabka waqooyi
    - Maalmaha aan la shaqeyn asbuuca iyo kuwa fasaxa ah albaabka bariga sidoo kale waa uu xiran yahay. Fadlan isticmaal albaabka wayn marka aad gelayso Isbitaalka Jaamacada.
- Isbitaalka Kansarka James iyo Machadka Cilmi baarista ee Solove: albaabka Wadada 12aad
- Wadada 12aad. Lama mari karo marinka buundada (dhammaan bukaanada iyo booqdayaasha waa inay u gudbaan albaabka qaybta hoose si ay usoo galaan Isbitaalka Jaamacada)
- Isbitaalka Jaamacada: albaabka wadada 12aad waxaa laga xiraa bukaanada iyo booqdayaasha inta lagu jiro maalmaha aan shaqadu jirin iyo kuwa fasaxa ah
    - Baakinada kale: Bukaanada iyo booqdayaasha fadlan dhiga baarbuurtiina geerasha BAABUURTA EE AMMAANKA AH kadibna isticmaala albaabka wayn ee Isbitaalka Jaamacada

Daryeelka Lagu bixiyo Taleefoonka

Waxaan soo saarnay tallaabooyin amni oo aan ugu talagalay dhammaan goobaheena si aan bukaanadeena oga dhigno dadka ammaan ah. Hase yeeshee, haddii aad jeclaan lahayd inaad dareento ammaan, iyo wax badel u ah booqashada xaruumaheena ayaa jadwalka booqashadaada soosocota ka dhigaaya balan taleefan ah. Xataa haddii aadan haysan daryeel bixiye kuu gaar ah, waxaad isticmaali kartaa daryeelka taleefoonka degdeg ah si aad maanta u aragto dhaqtar ka socda Gobalka Ohio.